IIB MA GALÒ

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 5aad | Muqdisho, 1 Disembar 1977 L. 12

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

FAAFINTA BIL SOO BAXA | جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## K O O B N I I N

### BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 72 ee 7 Sebtember 1977, Sharciga Jaamacadda Ummadda — Bog. 1173

### BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 7 Sebtember 1977, Xeerka Jaamacadda Ummadda L. 93 — » 1208

BOGGA KOOWAAD

# SHARCI

SHARCI L. 72 ee 7 Sebtember 1977, Sharciga Jaamacadda Ummadda.-

## — MADAXWEYNAHA —

- Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed -

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO AQOONSAN: In la beddelo Sharciga Lam. ya hay 47 ee 23kii Oktoobar 1974 ee Dhismaha Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, lana habeeyo sharci cusub oo la socon kara Siyaasadda Tacliinta Dalka;

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasiga ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Golaha Wasiirrada.

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

## QAYBTA I

## F A S I R A A D

### QODOBKA 1

1. Haddaan si kale loogu micnayn sharcigan, xeerka ama nidaamyada hoose (by laws), erayada soo socda waxaa loola jeedaa sida hoos ku qoran:

«WASAARADDA: Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare;

«WASIIRKA»: Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ama Wasiirkii kale oo ku-meel-gaar ahaan loo xilsaaro arrimaha Jaamacadda.

«JAAMACADDA»: Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed

«XEERARKA»: Xeerarka Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo ku sheegan Qodobka 60aad ee sharcigan.

«GUDDIGA SARE»: Guddiga u dhisan sida ku tilmaaman Qodobka 13aad ee Sharcigan, uguna sarreeya Maa-

«GOLAHA TACLIINTA»: guddiga u dhisan sida ku tilmaaman Qod. 17aad ee Sharcigan ee qaabilsan fulinta go'aannada sare.

«NIDAAMYADA HOOSE» : Wixii qawaaniin ah oo sharcigan iyo xeerarku awood u siiyaan dejintooda Guddiga Sare, Golaha Tacliinta iyo Raktarka ama Guddiyada ,Kulliyadaha, kuna saabsan Jaamacadda maamulkeeda hoose.

«SHAQAALAHA WAXBARIDDA : Shaqaalaha Jaamacadda macalimiinta ka ah, kuwa cilmi baaridda ku hawlan, Raktarka iyo Ku-xigeenkiisa. Hormuudyada. Buug Xannaaniyaha Guud, Diiwaaniyaha Guud iyo ciddii kaloo laga dhigo.

2. Erayada lagu fasiray xubinta sare, haddaan si kale loogu fasirin Xeerarka iyo nidaamiyada hoose ee loo dejiyo dhaqanka gudaha ee Jaamacadda, isla fasiraaddaas ayay yeelanayaan.

## QAYBTA II

## DHISMAHA IYO UJEDDOOYINKA JAAMACADDA

### QODOBKA 2

1 Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (oo wixii halkan ka dambeeya lagu magacaabi doono Jaamacadda) oo ku dhisnayd Sharciga Lam. yahay 47 ee 23kii Oktoobar 1974, waxay u jiraysaa Wakaalad Madax Bannaan ahaan iyadoo shakhsiyad qaanuuni ah leh oo magaceedii hore iyo astaanteedii sharciga ahayd midna aan laga beddelin, waxayna u hoggaansamaysaa sharcigan, Xeerarka iyo nidaamyada hoose ee loo dejiyo.

2. Jaamacaddu sharciyada guud oo u degsan Wakaaladaha Madaxa bannaan waxay uga hoggaansamaysaa oo keliya, intay sharcigaan iyo xeerarku tilmaamaan ama laga fursan waayo in lagu dhaqo.

3. Hadday qodobbada sharcigaan isdiidaan sharciyada guud ee ku sheegan xubinta hore, amase sharciya kaleba, waxaa la raacayaa kuwa sharcigan.

## QODOBKA 3

## UJEEDDOOYINKA GUUD EE JAAMACADDA

Ujeeddada guud ee Jaamacaddu waa inay suurageliso horumarinta waxbarashada sare ee JDS gudaheeda iyo inay dadka gaarsiiso, iyadoon sina u kala soocin heer ay ku helaan tacliin sare oo hantiwadaag ah oo loo siman yahay.

## QODOGKA 4

## XARUNTA JAAMACADDA

1. Xarunta Jaamacaddu waxay ahaan doontaa Muqdisho.
2. Jaamacaddu waxay ka samaysan kartaa :

b) Kulliyado iyo Machadyo meelo Muqdisho ka baxsan ;

t ) Dugsiyo tababar, meel kasta oo Waddanka ka mid ah, markay dareento baahida loo qabo, awooddeeduna u oggolaato.

## QODOBKA 5

## ILAALINTA GUUD EE JAAMACADDA

1. Ilaalinta Guud ee Jaamacadda waxaa yeelanaya Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare ama Wasiirkii kale oo loo xilsaaro ku-meelgaar ahaan oo u fulinaya si waafaqsan sharcigaan.

2. Wasiirku, hadba markay ugu muuqato lagama maarmaan, wuxuu ka siinayaa Jaamacadda tilmaamo guud (directions, wixii arrimo suuragal ah, oo sharcigaan ama mid kaloo Jaamacadda loo dejiyaa waqtiga soo socda, si cad ugu bannaynayo.

## QODOBKA 6

## LA SOCODSIINTA JAAMACADDA SIYAASADDA DAWLADDA

Iyadoo aan wax loo dhimayn waajibaadka iyo hawlaha sharcigani u yeelayo, la dhowrayaana hadba wixii sharciya kale arrintan ku saabsan oo soo baxa, Wasiirka oo leh kaalin xiriiriye Dawladda iyo Jaamacadda, waajibkiisa ugu horreeyaa waa inuu la socodsiiyo Guddiga Sare iyo Raktarka, siyaasadda guud ee Dawladda, garwaaqsiiyana isagoo ugu tebinaya talooyin guud (directives), siyaasadda, dhaqaalaha iyo horumarka bulshada iyo waxbarashada ee Dalka loogu talagalay in la gaarsiiyo.

## QODOBKA 7

## HIMILOOYINKA JAAMACADDA

1. Iyadoo aan wax loo dhimayn guud ahaan arrimaha uu sheegayo Qod. 3aad ee Sharcigani, himilooyinka Jaamacaddu waa :

b) Horumarinta tacliinta sare ee JDS, si ay uga caawiso in laga gaaro horukac degdeg ah iyo isbeddel dhan walba nolosha dalka ;

t) Inay ka haqab bixiso Waddanka baahida uu u qabo inuu iskaga fillaado xoogsato tababaran ;

j) Inay kor u qaaddo waxbarashada, iyadoo kaashanaysa horumarka laga gaaray Teknoloojiyada iyo cilmiga oo laga doonayo inay la socoto, ayna ku fidiso bulshada aqoonta sayniska ;

x) Inay kor u qaaddo garaadka bulshada ee Mabda'a Hantiwadaagga, taasoo lagu gaari karo abuuridda indheergarato aqoon hantiwadaag ah leh oo xiriirin karta qaybaha dadweynaha, iyo inay si dhab ah uga qaybgasho kobcinta garaadka siyaasiga ah ee bulshada ;

kh) Inay habayso, si fiicanna u dejiso, tacliin heer sare oo la aqoonsan yahay;

d) Inay iswaafajiso jaadadka iyo heerarka kala duwan ee habka tacliinta Waddanka u degsan ;

r) Inay xil iska saarto, dhiirrina geliso cilmi baarista;

s) Inay heegan u tahay fulinta iyo xaqiijinta barnaamijka iyo distuurka XHKS ;

sh) Inay fiiro gaar ah u yeelato horumarinta iyo fidinta Hiddaha Ummaddeenna ;

dh) Inay ka qaybgaadato hagaajinta habka Maamulka Dawladda.

2. Golaha Tacliintu ,si Jaamacaddu himilooyinka xubinta sare ku sheegan ku gaarto, waa inuu mid walba qorsha tifaftiran u sameeyaa soona hordhigaa Guddiga Sare, si uu kalsooni uu ku fuliyo uga helo.

## QODOBKA 8

## AWOOD GUUD

Jaamacaddu waxay awood u leedahay, iyadoo la raacayo sharcigan ama sharciyada kaloo u degsan Waddanka, inay ku dhaqaaqdo wax kastoo u suuragelinaya inay fuliso ujeeddooyinkeeda, kuna gaarto himilooyinkeeda.

## QODOBKA 9

## XUQUUQDA JAAMACADDA

1. Jaamacaddu waxay xaq u leedahay inay ardada uga qaaddo cashuuro iyo kharajyo siduu hadba ugu qarriro Guddiga Sare.

2. Guddiga Sare, hadba markay la noqoto amase Raktarku u soo jeediyo isagoo dhegeystay ra'yiga Golaha Tacliinta, haftooyinka cashuuraha ama kharajyada qaarkood, dib ayuu ugu noqon karaa waxna uga beddeli karaa.

## QAYBTA III

## HABKA DHISMAHA MAAMULKA IYO HAWLAHA

## XUBNAHA SARE

### QODOBKA 10

### XUBNAHA JAAMACADDA

1. Xubnaha Sare ee Jaamacaddu waxay ka kooban yihiin: Duqa Jaamacadda (Chancellor), Guddiga Sare, Golaha Tacliinta, Rektarka, Ku-xigeenka Raktarka, Guddiga Kulliyadda, Horuudyada, Diiwaaniyaha Guud, Buug Xannaaniyaha Guud, Agaasimeyaasha Waaxyaha iyo Guddiga Cilmi Baaridda.

2. Golaha Tacliintu wuxu awood u leeyahay inuu abuuro xubna hoose markii loo baahdo, oo uu Raktarku u soo jeediyo isagoo la tashaday Wasiirka.

### QODOBKA 11

### DUQA JAAMACADDA (Chancellor)

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Duqa Jaamacadda (Chancellor).

2. Jagada Duqa Jaamacaddu waxay noqonaysaa mid xushmadeed, laguna qaadan maayo mushaar, gunno iwm.

3. Duqa Jaamacaddu wuxu noqonayaa hadba ruuxii jagada madaxtinnimada Jamhuuriyadda haya.

### QODOBKA 12

### HAWLAHA DUQA JAAMACADDA

1. Duqa Jaamacaddu wuxuu guddoominayaa xafladaha maamuuska Jaamacadda oo dhan, wuxuuna ardada mutaysatay, markii la eego inay ku guulaysteen imtixaannadii kana soo baxeen shuruudihii kale oo jaamacaddu u dejisay, guddoonsiinayaa shahaaddooyinka sare (oo ay ka mid yihiin shahaaddooyinka xushmada), dibloomooyinka, marag-kac (cer-

2. Duqa Jaamacaddu wuxuu kaloo ka qaybqaadanayaar hawshii kaloo Jaamacadda oo Raktarku ku sharfo, iyadoo Golaha Tacliintu kula taliyay amase isaguba uu goosto degdegsiino owgeed.

3. Duqa Jaamacaddu wuxuu Guddoomiye sharaf u noqonayaa Guddiga Sare.

4. Markii maqnaasho gaaban, jirro amase ay si kale ugu suuroobi waydo inuu Duqa Jaamacaddu hawshiisa si caadi ah u guto, waxaa ku simaya Guddoomiyaha Guddiga Sare.

## QODOBKA 13

## GUDDIGA SARE EE JAAMACADDA

Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Guddi Sare oo ka kooban xubnaha soo socda:

1. Duqa Jaamacadda (Chancellor) oo ka noqonaya Guddoomiye xushmadeed;
2. Wasiirka oo ka ah Guddoomiye;
3. Raktarka Jaamacadda oo ka noqonaya Guddoomiye Kuxigeen;
4. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, Xubin
5. Wasiirka Wasaaradda Sancada — Xubin
6. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda — Xubin
7. Wasiirka Wasaaradda Macdanta — Xubin
8. Wasiirka Wasaaradda Beeraha — Xubin
9. Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka — Xubin
10. Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud — Xubin
11. Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Diinta — Xubin
12. Wasiirka Wasaaradda Xann. Xoolaha Dh. iyo Daaqa Xubin
13. Guddoomiyaha Qorshaha Qaranka Soomaaliyeed Xubin
14. Ku-xigeenka Raktarka;
15. Agaasimaha Guud Was. Hidd. iyo Tac. Sare — Xubin
16. Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista — Xubin
17. Guddoomiyaha Hoggaanka Aydoloojiyada — Xubin
18. Guddoomiyaha Hoggaanka Tac. Bar iyo Ciyaaraha Xubin
19. Saddex qof oo waxya aqoonima [illegible]

## QODOBKA 14

## HAWLAHA GUDDIGA SARE

Gudiga Sare hawlaha xeerarka iyo nidaamyada hoose u yeelaan, waxaa u dheer :

b) Inuu dejiyo siyaasadda tacliinta Jaamacadda iyo shuruudaha guud ee gelitaanka isagoo tixgelinaya tilmaamaha guud ee Golaha Dhexe XHKS, Madaxweynaha, Wasiirka iyo xubnaha kale ee ku shaqa leh;

t) Inuu diyaariyo kana doodo sharciyada iyo xeerarka loo dejinayo Jaamacadda, guddoomiyana in loo gudbiyo xubnaha awoodda sharciyada iyo xeerarka dejintooda leh ;

j) Inuu bixiyo deeq waxbarasho (scholarship) iyo abaalgudyo;

x) Inuu guddoonsiiyo qofkii u mutaysta si waafaqsan nidaamyada hoose shahaadada sare ee Xushmada (honorary degree) iyo aqoonsiyada kale ee tacliineed ;

kh) Inuu dhiirrigeliyo horumarinta cilmi baarista.

## QODOBKA 15

## AWOODAHA GUDDIGA SARE

Guddiga Sare awoodaha xeerarka iyo nidaamyada hoose u yeelaan, waxaa u dheer :

1. Inuu dejiyo nidaamyo hoose (by-laws) hawlaha waxbarashada Jaamacadda intooda ayan daboolin xeerarka u degsan Jaamacadda.

2. Inuu magacaabo abuurana guddiyo waxbarasho oo ka kaaliya hawlaha waxbarashada, isaga iyo guddiyada kulliyadaha.

3. Inuu dhinac ka noqda heshiisyada lagama maarmaanka u noqda fulitaanka hawlihiisa, ama u wakiisho Raktarka markay la noqoto inay ku habboon tahay arrintu, in wakaalad lagu fuliyo.

4. Inuu soo gadan karo hantida guurta iyo tan ma guurtada ah oo u noqota lagama maarmaan inuu ku fushado hawlihiisa; isla ujeeddadaasna waa isaga iibin karaa; kirayn karaa, amaah lacageed ugu rahmi karaa, siduu doono kalena ugu isticmaali karaa hantidaas;

5. Inuu geliyo maaliyadda Jaamacadla mar kastoo uu door bido, wixii dani ugu jirto Jaamacadda.

6. Inuu oggolaado Miisaaniyadda Jaamacadda, baarid guudna ku sameeyo maamulka maaliyadda Jaamacadda, isagoo dhowraya sharciga iyo xeerarka u degsan arrintaas;

7. Inuu abuuro kulliyado, machadyo iyo dugsiyo kale, hadba intii awooddu oggolaato, isagoo tixgelinaya baahida iyo qorshaha guud ee Dalka;

8. Inuu. isagoo raacaya ra'yiga Golaha Tacliinta, u sameeyo si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada hoose oo arrintaas ku saabsan, shahaadooyin sare, dibloomayaal, maragkac iyo aqoonsiyada kale ee tacliineed;

9. Inuu gooyo in laga qaado ardada duruusta ka raacata Jaamacadda cashuuro, xuquuq kale iyo hawl, markay habboonaato; sidoo kalena uga cafin karo;

10. Inuu aqbali karo deeq (donation);

11. Inuu abuuro u magacaabana guddiyo joogta ah ama kuwo aan joogto ahayn, ama labadaba, fulitaanka arrimaha la xiriira hawlihiisa iyo awooddiisa;

12. Guddiga Sare wuxuu kaloo awooddeeda leeyahay magacaabidda Hormuudyada Kuuliyadaha, Diiwaaniyaha Guud, Buug Xannaaniyaha Guud iyo xubnaha kaloo waaweyn ee sharcigan jiritaankooda sheegayo, Raktarka iyo Ku-xigeenka Raktarka mooyaane.

## QODOBKA 16

## SHIRARKA GUDDIGA SARE

1. Guddiga Sare oo joogta noqonaya wuxuu isugu imanayaa fulinta hawlihiisa,xilligiiba mar, waqtiga iyo meesha Guddoomiyuhu sheego

2. Guddigu shir aan caadi ahayn wuxuu yeelan karaa markay :

b) Guddoomiyaha lagama maarmaan la noqoto ama

t) Saddex meelood oo labo xubnaha Guddigu codsadaan.

3. Guddiga Sare wuxuu awood u leeyahay inuu shirkiisa ka soo qaybgeliyo dad aan ka tirsanayn, iyagoon cod ku yeelanayn.

4. Xeerarka loo soo saarayo dhaqan gelinta sharcigan ayay ku cad yihiin wixii ku saabsan habka socodsiinta shirarka Guddiga Sare, ogaysiinta waqtiga shirka la qabanayo ajeendada, tirada looga baahan yahay inay ka soo qaybgasho, cod si loo qaadayo iyo faahfaahinta xusuusaha shir walba looga baahan yahay.

5. Haddeeyan sharcigan iyo xeerarku u dejin nidaam fulinta hawlaha iyo ku dhaqanka awoodaha Guddiga Sare, isagaa samaysanaya nidaamya hoose si uu habsami ugu fushado hawlihiisa, una isticmaalo awooddiisa. Nidaamyadaas hoose waxay dhaqan gelayaan markay saxiixaan Wasiirka iyo Raktarku, haddaan taariikh kale loo qaban.

## QODOBKA 17

## GOLAHA TACLIINTA

Iyadoon wax loo dhimayn awoodaha Guddiga Sare iyo Raktarka, lana dhawrayo qodobbada sharcigan, awoodda fulinta hawlaha Jaamacadda waxaa loo xilsaarayaa Golaha Tacliinta oo ka kooban :

1. Raktarka oo guddoonshe ka ah;
2. Ku-xigeenka Raktarka oo gudoonshe ku-xigeen ka ah ;
3. Hormuudyada kulliyadaha
4. Diiwaaniyaha Guud oo Xoghaye ka ah ;
5. Buug Xannaaniyaha Guud ;

6. Agaasimayaasha Maamulka, Qorshaha iyo Arrimaha Bulshada ee Jaamacadda ;

7. Bare ka tirsan shaqaalaha waxbaridda oo kulliyad walba sannadkii soo dooranayso ;

8. Madaxa Ururka Shaqaalaha ;

9. Madaxa Ururka Ardada ;

10. Madaxa Unugga Xisbiag ;

11. Madaxa Faraca Xisbiga ;

## QODOBKA 18

## HAWLAHA GOLAHA TACLIINTA

Hawlaha Golaha Tacliintu waxay noqonayaan :

b) Fulinta Siyaasadda Jaamacadda oo dhan iyo go'aannada Guddiga Sare ;

t ) Inuu u qabanqaabiyo barnaamijyo waxbarasho ardada aan Jaamacadda gudaheeda ku noolayn ;

j ) Inuu siiyo shahaadooyin sare, dibloomooyin, maragkac iyo aqoonsiyo kale oo tacliineed dadkii raacay kuna guulaystay barnaamijyo tacliineed oo uu dejiyay Guddiga Sare ;

x) Inuu diyaariyo Miisaaniyadda Jaamacadda, uguna gudbiyo Guddiga Sare oggolaansho ;

kh) Inuu seminaarro sameeyo oo lagu tababaro Macallimiinta Jaamacadda iyo inuu bixiyo wixii deeq tacliineed oo waqti dheer iyo kuwa waqti gaaban (fellowships) ;

d) Inuu qorsheeyo kormeerana fulinta siyaasadda imtixaannada;

r) Inuu dhiirrigeliyo horumarinta cilmi baaridda, una meeleeyo kharajka looga baahan yahay.

s) Inuu ilaaliyo qalabka Jaamacadda, kormeerna ku sameeyo kharajkeeda oo dhan.

QODOBKA 19

AWOODDA GOLAHA TACLIINTA

Golaha Tacliintu wuxuu awood u leeyahay :

b) Inuu wax ka beddelo Manhajka Jaamacadda, oo ay u soo gudbiyaan Guddiyada Kulliyaduhu. intuu-san weli isu dhaafin Guddiga Sare ;

t) Inuu u noqdo shaqaalaha Jaamacadda Guddiga Dhexe ee Asluubta ;

j) Inuu ilaaliyo, kormeerana wax alla wixii ku saab-san arrimaha ardayda ;

x) Isagoo oggolaansho ka haysta Guddiga Sare, inuu heshiisyo laba dhinac ama ka badan la galo hay'ado waddani ah ama kuwa qalaad;

kh) Inuu magacaabo shaqaalaha waxbaridda ee Jaama-cadda, ka dib marka uu oggolaansho ka helo Gud-diga Sare.

QODOBKA 20

R A K T A R K A

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Raktar uu maga-caabo Golaha Dhexe ee XHKS, iyadoo uu soo jeediyay Wa-siirka oo cuskanaya talada Guddiga Sare.

2. Raktarku wuxuu jagada ku negaanayaa muddo afar (4) sano ah oo loo cusboonaysiin karo. Mushaarkiisa iyo gunnooyinka uu muddadaas qaadanayo waxaa lagu goynayaa Dekreetada Madaxweynaha ee lagu magacaabayo.

3. Qofka loo magacabayo Raktarka waa inuu leeya-hay tacliin Jaamacadeed oo sare iyo waaya-aragnimo maa-mul.

QODOBKA 21

CASILAADDA RAKTARKA

Raktarka waxaa laga qaadi karaa xafiiskiisa :

a) Hadday dhacaan arrimaha soo socda :

i) Ku dhaqan xumaansho xafiiska ;

ii) Maxkamadi ku caddayso jariimad uu galay;

iii) Xilkiisa ka soo bixi waayo ;

iv) Dhimirkiisa wax u dhinmaan taasoo uu caddeeyo Guddiga Takaatiirta oo ku shaqo lihi.

b) Markuu ku taliyo Guddiga Sare oo go'aan ku gaaray aqlabiyad dhan saddex meelood oo labo (2).

## QODOBKA 22

## HAWLAHA RAKTARKA

1. Raktarku wuxuu noqonayaa Guddoomiye ku-xigeen ka Guddiga Sare iyo Guddoomiyaha Golaha Tacliinta Jaamacadda.

2. Raktarku wuxuu kaloo :

b) Noqonayaa Sarkaalka ugu sarreeya Shaqaalaha Waxbaridda iyo kan Maamulka Jaamacadda, wuxuuna Guddiga Sare iyo Wasiirka, mar walba, kala talinayaa arrimaha saameeya waxbarashada, siyaasadda, dhaqaalaha iyo maamulka Jaamacadda ;

t ) Uga noqonayaa mas'uul Guddiga Sare, inay Jaamacaddu ku sugnaato habsami ay ku gaarto ujeeddooyinkeeda iyo dhaqan gelinta sharciga, xeerarka iyo nidaamyada hoose ee Jaamacadda u degsan ;

j ) Mas'uul ka noqonayaa asluubta Jaamacadda dhexdeeda, sababtaa awgeedna, wuxuu soo saari karaa nidaamyo hoose oo isla markaa dhaqan gelaya, hase ahaatee laga doonayo inuu soo hordhigo Guddiga Sare fadhigiisa ugu soo horreeya si uu oggolaansho uga helo ;

x) Isugu yeerayaa, guddoominayaa, diyaarinayaa ajendooyinka shirarka Golaha Tacliinta ;

kh) U masalayaa Jaamacadda arrimaha la xiriira oo dhan, ama magacaabayaa ciddii kaloo beddelkiisa masali lahayd, haddaan Guddiga Sare sidaas amar diidaya bixin;

d) Ku saxiixayaa magaca Jaamacadda heshiisyo ay dhinac ka tahay, isagoo kalsoonida Guddiga Sare haysta. Guddigu wuxuu kalsoonidiisa u bixin karaa si guud ahaaneed ama si gaar ahaaneed oo ku cad-daysan warqadda uu ku bixiyay ;

r ) Magacaabayaa Madaxa Qaybaha iyo Waaxyaha Kul-liyadaha isagoo dhegaystay ra'yiga Guddiga Kulli-yadda ;

s ) Fulinayaa tilmaamaha guud oo ka soo baxa Golaha Dhexe ee XHKS, Madaxweynaha, kuwa Wasiirka iyo go'aannada Guddiga Sare iyo Golaha Tacliinta;

sh ) Ka qaadanayaa tallaabooyin ku saabsan maamulka ama kuwa asluubeed shaqaalaha iyo ardada Jaama-cadda, haddaan tallaabooyinka noocaas ah sharci-gan, xeerarka iyo nidaamyada hoose cid kale awooddooda siin.

QODOBKA 23

KU-SIMAHA RAKTARKA

Hadday Raktarka la soo gudboonaadaan maqnaansho gaaban ama sababa kale oo ka hor istaagaya inuu guto haw-shiisa caadiga ah, waxaa xilkiisa fulinaya Ku-xigeenka Rak-tarka.

QODOBKA 24

KU-XIGEENKA RAKTARKA

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa ku-xigeenno Raktar oo jagada ku negaanaya muddo saddex (3) sano ah laguna magacaabayo Dekreeto Madaxweynaha, iyadoo uu soo jeedi-yay Wasiirka oo dhegeystay ra'yiga Golaha Tacliinta, cuska-nayaana talada Guddiga Sare. Ku-xigeenka Raktarka waxaa xilka looga qaadi karaa sida ku xusan Qod. 21aad ee sharci-gan.

2. Qofka loo magacaabayo jagada Ku-xigeenka Raktar-ka, waa inuu leeyahay tacliin Jaamacadeed oo sare iyo waaya-aragnimo maamul.

3. Ku-xigeenka Raktarku waa inuu Raktarka ka kaa-

4) Ku-xigeenka Raktarku wuxuu kaloo :



t ) Hadday ku caddayso saddex meelood labo Golaha Tacliintu inuu ka soo bixi waayay xilkiisii, amase karti darro awgeed shaqada u fulin kari waaya, Guddiga Sarena oggolaado.

## QODOBKA 29

## GUDDIGA KULLIYADDA

1. Kuliyad waliba waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban :

b) Hormuudka Kulliyadda oo guddoomiye ka noqonaya ;

t ) Madaxa Qaybaha ;

j ) Madaxa Waaxyaha ;

x) Xubno ka tirsan shaqaalaha waxbaridda oo qayb waliba sannadkiiba qof soo doorta;

kh) Kaaliyaha Diiwaaniayaha ee kulliyadda oo Xoghaye ka noqonaya isagoo aan cod ku lahayn shirkaa:

d) Kaaliyaha Buug-xannaaniyaha ;

r ) Guddoomiyaha Guddiga Ardada ee Kulliyadda ;

s) Madaxa Unugga Xisbiga ;

sh ) Guddoomiyaha Guddiga shaqaalaha Kulliyadda

dh) Wakiilka Faraca Xisbiga.

2. Hadduu Hormuudku ka maqnaado shir guddigu leeyahay, waxaa beddelaya oo guddoominaya shirkaas iyo fa-

d) Ku saxiixayaa magaca Jaamacadda heshiisyo ay dhinac ka tahay, isagoo kalsoonida Guddiga Sare haysta. Guddigu wuxuu kalsoonidiisa u bixin karaa si guud ahaaneed ama si gaar ahaaneed oo ku caddaysan warqadda uu ku bixiyay ;

r ) Magacaabayaa Madaxa Qaybaha iyo Waaxyaha Kulliyadaha isagoo dhegaystay ra'yiga Guddiga Kulliyadda ;

s ) Fulinayaa tilmaamaha guud oo ka soo baxa Golaha Dhexe ee XHKS, Madaxweynaha, kuwa Wasiirka iyo go'aannada Guddiga Sare iyo Golaha Tacliinta;

sh ) Ka qaadanayaa tallaabooyin ku saabsan maamulka ama kuwa asluubeed shaqaalaha iyo ardada Jaamacadda, haddaan tallaabooyinka noocaas ah sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose cid kale awooddooda siin.

QODOBKA 23

KU-SIMAHA RAKTARKA

Hadday Raktarka la soo gudboonaadaan maqnaansho gaaban ama sababa kale oo ka hor istaagaya inuu guto hawshiisa caadiga ah, waxaa xilkiisa fulinaya Ku-xigeenka Raktarka.

QODOBKA 24

KU-XIGEENKA RAKTARKA

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa ku-xigeenno Raktar oo jagada ku negaanaya muddo saddex (3) sano ah laguna magacaabayo Dekreeto Madaxweynaha, iyadoo uu soo jeediyay Wasiirka oo dhegeystay ra'yiga Golaha Tacliinta, cuskanayaana talada Guddiga Sare. Ku-xigeenka Raktarka waxaa xilka looga qaadi karaa sida ku xusan Qod. 21aad ee sharcigan.

2. Qofka loo magacaabayo jagada Ku-xigeenka Raktarka, waa inuu leeyahay tacliin Jaamacadeed oo sare iyo waayaaragnimo maamul.

3. Ku-xigeenka Raktarku

4) Ku-xigeenka Raktarku wuxuu kaloo :

b) Ilaalinayaa wax allaale wixii ku saabsan maaliyad, xisaabo iyo waxay Jaamacaddu soo gadanayso;

t ) Xiriirinayaa is-waafajinayaa barnaamijyada Jaamacadda kulliyadaheeda oo dhan iyo dugsiyada la xiriira, oo Golaha Tacliintu guddoomiyo;

j ) Kormeerayaa ilaalinayaana barnaamijka tacliinta ee kuliyadaha iyo qaybaha Jaamacadda ;

x) Fulinayaa wixii kaloo hawl iyo waajibaad ay u xilsaaraan Guddiga Sare, Golaha Tacliintu iyo Raktarka, amase xeerarka iyo nidaamyada hoose sheegayaan.

## QODOBKA 25

## KULLIYADAHA JAAMACADDA

1. Iyadoo tixgelinaysa awooddeeda dhaqaale iyo siday u heli karto shaqaale ku filan, Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Kulliyado.

2. Kulliyad walibana waxay yeelanaysaa Qaybo iyo Waaxyo, hadba intii ku filan, si ay u fuliso ujeeddooyinkeeda.

## QODOBKA 26

## HORMUUDYADA KULLIYADAHA

1. Kulliyad waliba waxay yeelanaysaa Hormuud oo ay kaalmaynayaan Madaxda Qaybaha iyo Waaxyuhu.

2. Hormuudka Kulliyadda oo noqonaya Sarkaalka ugu sarreeya waxbarashada iyo maamulka Kulliyadda, waxaa magacaabaya Guddiga Sare oo dhegeystay Raktarka, oo dhegeystay ra'yiga Golaha Tacliinta iyo Guddiga Kulliyaddaas. Qofka jagadaas loo xilsaarayo waa in laga xulaa Barfasoorrada, Barayaasha sare iyo Barayaasha kulliyadaha, wuxuuna xilka haynayaa muddo laba (2) sano ah oo loo cusboonaysiin

## QODOBKA 27

## HAWLAHA HORMUUDKA KULLIYADDA

1. Hormuudka Kulliyadda oo mas'uul uga ah arrimaha kulliyadda Guddiga Sare iyo Golaha Tacliinta, isagoo hoos imanaya Raktarka, waxay guud ahaan hawshiisu tahay fulinta siyaasadda waxbarashada iyo siyaasaddii kale oo loo dejiyay kulliyadda; wuxuu kaloo hubinayaa in Madaxda Qaybaha iyo Waaxyuhu si habboon u fulinayaan siyaasaddaas iyo tan uu dejiyo Guddiga Kulliyaddu; wuxuu kaloo :

b) U masalayaa kulliyadda hawl kasta ;

t ) Guddoomiye ka noqonayaa Guddiga Asluubta Kulliyadda iyo Guddiga Qalinjibinta ;

j ) La saxiixayaa Raktarka iyo Diiwaaniyaha Guud shahaadooyinka sare, dibloomooyinka, Marag-kaca iyo wixii kale oo shahaado laga dhiibo Kulliyadda;

x) U soo jeedinayaa magacaabidda macallimiinta cusub oo kulliyadda ku soo biiraya, si waafaqsan ra'yiga qaybaha iyo Guddiga Kulliyadda.

2. Hormuudka Kulliyaddu wuxuu kaloo mas'uul ka noqonayaa :

b) Kormeerka iyo maamulka waxbarashada kulliyadda;
t ) Maamulka maaliyadda kulliyadda ;
j ) Dhawrista habsamida socodsiinta hawlaha kulliyadda, si waafaqaan sharciga, xeerarka iyo nidaamyada hoose.

## QODOBKA 28

## CASILAADDA HORUMUUDKA

Hormuudka Kulliyadda oo jagada loogu magacaabay si rasmi ah, xilka waxaa laga qaadi karaa hadday dhacaan sababaha ku sheegan sharcigan qodobkiisa 21aad ama la helo sababaha hoos ku taxan :

b) Go'aan uu gaaray Golaha Tacliintu markii loo dhigo saddex meelood labo oo caddaynaya inuu ku kacay

t ) Hadday ku caddayso saddex meelood labo Golaha Tacliintu inuu ka soo bixi waayay xilkiisii, amase karti darro awgeed shaqada u fulin kari waaya, Guddiga Sarena oggolaado.

## QODOBKA 29

## GUDDIGA KULLIYADDA

1. Kuliyad waliba waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban :

b) Hormuudka Kulliyadda oo guddoomiye ka noqonaya ;

t ) Madaxa Qaybaha ;

j ) Madaxa Waaxyaha ;

x) Xubno ka tirsan shaqaalaha waxbaridda oo qayb waliba sannadkiiba qof soo doorta;

kh) Kaaliyaha Diiwaaniayaha ee kulliyadda oo Xoghaye ka noqonaya isagoo aan cod ku lahayn shirkaa:

d) Kaaliyaha Buug-xannaaniyaha ;

r ) Guddoomiyaha Guddiga Ardada ee Kulliyadda ;

s) Madaxa Unugga Xisbiga ;

sh ) Guddoomiyaha Guddiga shaqaalaha Kulliyadda
dh) Wakiilka Faraca Xisbiga.

2. Hadduu Hormuudku ka maqnaado shir guddigu leeyahay, waxaa beddelaya oo guddoominaya shirkaas iyo fadhiyada dambe oo lagu gunaanadayo, Madaxda Qaybaha kan ugu daraja sarreeya (hadday daraja siman yihiinna kan ugu waayeelsan xagga shaqada).

3. Hadduu shirka ka maqnaado K/Diiwaaniyuhu, waxaa hawshiisii fulinaya K/Buug Xanaaniyaha. Hadday labadooduba ka maqan yihiin shirka, Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu xubnaha ka soo qaybgalay shirka

## QODOBKA 30

## HAWLAHA GUDDIGA KULLIYADDA

Guddiga Kulliyaddu, hawlaha ay u yeelaan xeerarka iyo nidaamyada hoose, waxaa u raaca:

b) Isagoo ku xiran oggolaanshaha Golaha Tacliinta, inuu diyaariyo Manhajka iyo barnaamijka waxbarashada kulliyadda, iyo nidaamka imtixaannada.

t) Inuu kala taliyo Golaha Tacliinta sida ugu doorroon oo laga jiba keeni karo baarista cimiga iyo mudnaanshaha kala hormarinta arrimaha baaristaasi khusayso.

j) Inuu warbixin ka siiyo Golaha Tacliinta, isagoo u sii marinaya Raktarka, xilligiiba mar, horumarka kuliyaddu ka gaartay arrimaha waxbarashada oo loo xilsaaray.

x) Inuu warbixin uu u sii marsiiyay Raktarka, ka siiyo Gudiga Sare xeerarka iyo nidaamyada hoose oo saamaynaya waxbarashada loogu talagalay shahaadooyinka sare iyo guud ahaan waxbarashada kulliyadda, isagoo ku soo jeedinaya warbixintiisa, hadday jiraan, xeer ama nidaamyo hoose oo loo baahan yahay in wax laga beddelo ama la buriyo.

kh) Inuu Golaha Tacliinta talo ka siiyo, uu sii marsiinayo Raktarka, bixinta shahaadooyinka sare (oo ka duwan shahaadada xushmada), dibloomooyinka, marag-kaca, deeqda tacliinta, abaalgudyada iyo ,aqoonsiyada kale (distinctions) ee kulliyadda;

d) Inuu noqdo Guddiga Asluubta Kulliyadda;

r) Inuu fuliyo go'aannada Guddiga Sare iyo Golaha Tacliintu u soo gudbiyaan, xogwarranna uga celiyo fulitaankooda.

## QODOBKA 31 (

## AWOODDA GUDDIGA ASLUUBTA KULLIYADDA

1. Guddiga Asluubta Kuliyaddu wuxuu awood u leeyahay inuu dhiso guddi hoose oo joogta ah ama mid aan joogta ahayn oo go'aan ka gaara arrima khaas ah.

2. Isagoo dhawraya qodobbada sharcigan Guddiga Asluubta Kulliyaddu wuxuu awood u leeyahay inuu go'aan ka gaaro falaadxumo kasta oo ku suubsan kuliyadda kana qaado tilaabo asluubeed.

3. Guddigu (ama Guddigii Hoose oo uu magacaabo) markuu naqayo gar asluubeed, oo ku saabsan xubin isaga ka mid ah, xubintaasi kama qaybgeli karto shirarka arrintaas lagu gunaanadayo.

## QODOBKA 32

## DIIWAANIYAHA GUUD

1. Diiwaaniyaha Guud waxaa magacaabaya Guddiga Sare oo dhegeystay talada Raktarka oo haysta oggolaanshaha Golaha Tacliinta, wuxuu mas'uul ka noqonayaa habka soo gelidda ardada, xafidaadda shaabbadaha Jaamacadda iyo diyaarinta warbixinnada ku saabsan tacliinta iyo caddaynta heerka tacliinta (transcript) ardada.

2. Diiwaaniyaha Guud wuxuu kaloo fulinayaa waajibaadka kale ee Guddiga Sare, Golaha Tacliinta iyo Raktarka u xilsaaraan.

3. Qofka loo magacaabayo Diiwaaniye Guud waa inuu wataa shahaado sare (degree) oo ay u dheertahay waaya-aragnimo maamul oo la garaysay.

## QODOBKA 33

## BUUG-XANNAANIYAHA GUUD

1. Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Buug Xannaaniye Guud oo uu magacaabo Guddiga Sare oo dhegeystay ra'yiga Raktarka ka dib markii uu ka helo oggolaansho Golaha Tacliinta. Jagadaas qofka loo xilsaaraa wuxuu mas'uul ka noqonayaa Rugta Buugaagta Jaamacadda iyo Laamaheeda.

2. Buug Xannaaniyaha Guud wuxuu kaloo mas'uul ka noqon doonaa daabacaadda buugaagta, wargeysyada, majallooyinka iyo warbixinnada ku saabsan.

3. Qofka loo magacaabayo Buug Xannaaniyaha Guud waa inuu wataa shahaado sare (degree) oy u raacaan waaya-aragnimo maamul iyo agaasin rug buugageed.

## QODOBKA 34

## DHISMAHA GUDDIGA CILMI BAARISTA

Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Guddi Cilmi Baaris oo ka kooban :

b ) Ku-xigeenka Raktarka oo guddoomiye ka ah ;

t ) Hormuudyada Kulliyadaha ;

j ) Laba xubnood oo ka mid ah shaqaalaha waxbaridda kulliyad walba, oo uu soo magacaabo Golaha Tacliintu isagoo dhegeystay talada Guddiyada Kulliyadaha ;

x ) Buug Xannaaniyaha Guud oo Xoghaye ka noqonaya ;

kh) Saddex aqoonyahan oo u leh waaya-aragnimo dheeraad ah hawlaha cilmi baaridda, oo aan ka tirsanayn shaqaalaha jaamacadda, Golaha Tacliintuna soo xulay.

## QODOBKA 35

## HAWLAHA GUDDIGA CILMI BAARIDDA

Hawlaha Guddiga Cilmi Baaridda waxay noqonayaan :

b) Inuu ka sameeyo unugyo cilmi baarid kulliyadaha iyo qaybaha dhexdooda ;

t ) Dhiirrigelinta, socodsiinta iyo horumarinta baarista cilmiga ;

j ) Inuu la yeesho xiriir joogta ah hay'adaha cilmi baaridda waddanka gudihiisa iyo kuwa caalamiga ah ;

x) Inuu u fidiyo kaalmo maliyadeed iyo mid kaleba dadkii ku hawlan baarid cilmi oo ku saabsan mowduucyo iyo arrimo ay kulliyadaha laga bartaa oggolaadeen.

## QODOBKA 36

## SHAQAALAHA JAAMACADDA

Shaqaalaha Jaamacaddu wuxuu ka kooban yahay shaqaalaha macallimiinta ah (oo lagu daro shaqaalaha cilmi baaridda), shaqaalaha kale oo waxbaridda, shaqaalaha Maamulka iyo dhammaan dadka kale ee hawsha joogtada ah ka qabta Jaamacadda

## QODOBKA 37

## MAGACAABIDDA SHAQAALAHA MAAMULKA JAAMACADDA

Wixii ka baxsan (ka hooseeya) kuwa ku xusan Qod. 10aad; Lamb. 1aad ee sharcigan, shaqaalaha Maamulka Jaamacadda waxaa magacaabaya Golaha Tacliinta, oo dhegeystay ra'yiga Raktarka.

## QODOBKA 38

## SHAQO KA FARIISINTA SHAQAALAHA JAAMACADDA

1. Haddaan sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose si kale qorayn, qof ka mid ah shaqaalaha waxbaridda Jaamacadda jagada uu ugu magacaaban yahay si rasmi ah, in looga beddelo jago u dhiganta maahee. lagama qaadi karo hadduusan jirin go'aan ay gaartay saddex meelood labo Golaha Tacliinta, iyadoo uu soo jeediyo Raktarka arrimo ku saabsan:

b) Inay ku caddaato fadeexad uu ku sameeyay xafiiska, sharafta hawshiisana wax u dhimaysa;

t) Maxkamadi go'aan ka gaartay jariimad uu galay;

j) Inay sugantay inuu karti daran yahay xilkiisana gudan karin;

x) Hadday dhimirkiisa wax u dhinmaan oo Guddiga Takhaatiirta ee ku shaqa lihi caddeeyay inuusan fulin karin hawshiisii;

kh) Markuu isagu warsado, Golaha Tacliintuna oggolaado;

d) Haddii ay jiraan sababa kale oo iska hortaagaya inuu fuliyo hawshiisa.

2. Shaqaalaha Jaamacadda, marka laga reebo shaqaalaha waxbaridda, waxaa ka fariisin kara jagada Raktarka isagoo raacaya habka ku degsan sharciga lagu maamulo shaqaalaha wakaaladaha madaxa bannaan, oggolaanshana ka haysta Golaha Tacliinta.

QODOBKA 39

**Mushaarka iyo Gunnooyinka Shaqaalaha Jaamacadda**

1. Mushaarka iyo gunnooyinka Macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee waxbaridda Jaamacadda, waxay ku cad yihiin xeerarka iyo nidaamyada hoose.

2. Guddiga Sare oo Wasiirku u soo jeediyay, isagoo la tashaday Rakarka ayaa awood u leh, si xeerarka waafaqsan, inuu mushaarka iyo gunnooyinka ku sheegan xubinta sare ee Qodobkan, hadba markii waqti la gaaro, fiiro lagu doorooonaysiinayo ugu laabto.

3. Haddaan sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose wax kale sheegayn, jagooyinka, mushaarooyinka iyo gunnooyinka ay qaadanayaan shaqaalaha maamulka Jaamacadda waxaa goynaya Golaha Tacliinta, isagoo tixgelinaya sharciga u degsan shaqaalaha wakaaladaha madaxa bannaan iyo ra'yiga Raktarka.

4. Shaqaalaha waxbaridda Jaamacadda waxaa loola jeedaa kan uu tilmaamayo Qodobka 55aad ee Xeerka Jaamacadda.

QODOBKA 40

**Hawlgabka iyo Gunnooyinka la xiriira (Xaqa)**

Hawlgabka iyo Gunnooyinka la xiriira shaqaalaha Jaamacadda waxaa lagu dhaqayaa sharciyada arrimahaas khuseeya oo lagu dhaqo Shaqaalaha Dawladda.

Q A Y B T A IV

URURKA ARDAYDA

QODOBKA 41

1. Waxaa la dhisay Ururka Ardada Jaamacadda (oo

2. Ururku wuxuu uga baahdo xagga maaliyadda iyo maamulka waxaa ka kaalmaynaya Jaamacadda isagoo isla mar ahaantaas samaysanaya ilo dhaqaale ka soo galaan.

3. Hawlaha iyo Xubnaha Maamulka (organs) Ururka waxaa lagu caddaynayaa xeerka iyo nidaamyada hoose.

4. Raktarku, isagoo dhawraya sharcigan, xeerarka, oggolaanshana ka haysa Golaha Tacliinta, wuxuu awood u leeyahay inuu xeer nidaamiye hoose oo ku saabsan dhismaha iyo hawlaha ururka soo saaro.

## QODOBKA 42

## DHISMAHA URURKA

Ururka Ardadu wuxuu yeelanayaa :

b) Guddoomiye oo ka noqonaya Guddoomiye Golaha Ardada ;

t) Xoghaye Guud oo ka noqonaya Xoghaye Golaha Ardada ;

j) Golaha Ardada Jaamacadda (oo hadda wixii ka dambeeya lagu magacaabayo Golaha Ardada).

## QODOBKA 43

## DOORASHADA GUDDOOMIYAHA IYO XOGHAYAHA GUUD EE URURKA

Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud ee Ururka ardada waxaa dooranaya Golaha Ardada, iyadoo Guddoomiyaha laga dhex dooranayo Guddoomiyeyaasha Ururrada Ardada ee Kulliyadaha; Xoghayaha Guudna laga dhex dooranayo Xoghayeyaasha Ururrada Ardada ee Kulliyadaha.

## QODOBKA 44

## URURKA ARDADA EE KULLIYADAHA

1. Kulliyad waliba waxay yeelanaysaa Urur Ardada Kulliyadda (oo hadda wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Ururka Kulliyadda) oo ka qaybgalkiisuna waajib ku

2. Hawlaha iyo Xubnaha Maamulka (Organs) Ururka Kulliyadda waxay si cad ugu qoran yihiin xeerarka iyo nidaamyada hoose.

3. Raktarka, ayaa, isagoo dhawraya sharcigan iyo xeerarka, lana tashaday Hormuudyada Kulliyadaha, wadajir ama gooni ahaan, soo saaraya nidaamya hoose oo lagu maamulo hawlaha, dhismaha iyo xubnaha maamulka Ururka Kulliyadda.

QODOBKA 45

XARUNTA IYO RUGTA URURKA ARDADA IYO URURKA KULLIYADDA

1. Xarunta Ururka Ardada waxay noqonaysaa Muqdisho, Rugta Dhexe ee laga maamulaana waxay ku oollaysaa isla meesha ay ku taal Rugta Dhexe ee Jaamacadda.

2. Xarunta iyo Rugta Dhexe ee Maamulka Ururka Kulliyaddu waxay noqonayaan Kulliyadda dhexdeeda.

## QAYBTA V

## ASLUUBTA

QODOBKA 46

GUDDIGA DHEXE EE ASLUUBTA

Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Guddi Dhexe ee Asluubeed oo awood u leh go'aan kama dambays ah inuu ka gaaro arrimo la xiriira asluubta iyo anshaxa shaqaalaha iyo ardada Jaamacadda.

QODOBKA 47

HAWLAHA GUDDIGA DHEXE EE ASLUUBTA

1. Hawlaha Guddiga Dhexe ee Asluubta waa :

b) Inuu dhegeysto racfaan laga soo qaatay Guddiyada Asluubta kulliyadaha ;

t) Inuu dhegeysto racfaan laga soo qaatay tallaabooyin ku saabsan kuwo asluubeed oo Raktarku garsoorkiisa gaar ahaaneed ku gaaray, aanna ku xusnayn sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose ee Jaamacadda ;

j) Inuu, markaan sharcigaan, xeerarka iyo nidaamyada hoose wax kale qabin, ku oogo dacwooyin asluubeed shaqaalaha Jaamacadda oo uusan Raktarku ku jirin; garta naqo kuna xukumo ciqaabta ku habboon ;

x) Guddiga Sare u soo jeedin karo inuu Rakarka ku qaado dacwo asluubeed.

2. Falalka keenaya dacwo asluubeed, ciqaabaha lagu xukumayo iyo habka locgu qaadayo dacwo dadka dhawri waaya nidaamyada ku saabsan asluubta, waxay ku tilmaaman yihiin xeerarka iyo nidaamyada hoose.

## QODOBKA 48

## ASLUUBTA KULLIYADDA DHEXDEEDA

1. Kulliyad waliba waxay yeelanaysaa Guddi Asluubeed oo awood u leh inuu go'aan ka gaaro arrimaha ku saabsan asluubta iyo anshaxa shaqaalaha iyo ardada Kulliyadda.

2. Guddiga Asluubta Kulliyaddu wuxuu Guddiga Dhexe ee Asluubta u soo jeedin karaa inuu dacwo asluubeed ku qaado Hormuudka iyo barayaasha kulliyadda.

## QAYBTA VI

## MAALIYADDA, XISAABAHA IYO BAARIDDODA

## QODOBKA 49

## MAALIYADDA JAAMACADDA

Jaamacadda waxaa maaliyaddu u soo geli kartaa sida hoos ku qoran, haddaan shsarcigan ama xeerarku si kale sheegayn :

— Kaalmo Dawladdu u fidiso ;

— Wixii ka soo gala cashuur, hawl, hibo iyo macaawino

— Dakhli ka soo gala qoraal iyo daabacaad ay samayso;

— Deeq Dawladeed oo kale, mid wakaaladeed, mid ururro caalami ah, mid ka timaadda dalal saaxiib ah, hay'ado iyo dad ajnabi ah, iyo hay'ado iyo dad Soomaali ah.

QODOBKA 50

KEYDINTA MAALIYADDA

Wax allaale wixii lacag Jaamacaddu leedahay, Agaasimaha Maamulka Lacagta ayaa ku kaydinaya Banki JDS ka furan, isagoo Raktarka iyo Ku-xigeenkiisa oggolaansho ka qaba.

QODOBKA 51

BAARIDDA XISAABAHA JAAMACADDA

Iyadoo aan wax loo dhimayn awoodda Golaha Tacliinta shareigani u bannaaynayo inuu sameeyo Guddi joogta ah oo awood u leh baaris kedis ah inuu ku sameeyo xisaabaha Jaamacadda warbixinna uga soo diyaariyo, xisaabaha Jaamacadda waxaa loo baarayaa si waafaqsan sharciga u degsan Wakaaladaha.

QAYBTA VII

QODOBBO GUUD

QODOBKA 52

QORASHO SHAQAALE QALAAD

1. Jaamacaddu waxay awood u leedahay inay qorato shaqaalo shisheeye ah markii ay lagama maarmaan noqoto, iyadoo la geleysa heshiis, ka dib marka la tixgeliyay xeerka Lamb. 33 ee 25. 12. 1969.

2. Wax allaale wixii ku saabsan waajibaadka iyo xuquuqda shaqaalaha loo qoray sida kor ku sheegan waxaa lagu dhaqayaa heshiiskaas la kala saxiixday:

## QODOBKA 53

## MAGACAW GUDDIYAAL

1. Guddi kastoo sharcigan lagu dhisay, wuxuu awood u leeyahay inuu dhisto Guddiyo Hoose oo ka kooban xubno isaga ka tirsan una fuliya hawlihiisa qaarkood.

2. Haddayan sharcigan iyo xeerarku si kale sheegayn, dhismaha, habka socodsiinta shirarka iyo tirada xubnaha ka qaybgelaya guddiyada qodobkani ka hadlayo waxay noqonayaan siduu garto guddigii dhisay ama shirkaas qabtay.

## QODOBKA 54

## KA DHAAFID CASHUUR IYO WAAJIBAAD KALE

Iyadoo aan la burinayn sharciyada jira oo arrintan ku saabsan, Jaamacaddu wax cashuur ah ama waajibaad kale kama bixinayso hantida ay soo wareegsanayso ama soo gadanayso oo u sahlaysa fulitaanka hawlaha waxbarashada.

## QODOBKA 55

## SHAABADDA JAAMACADDA

Jaamacaddu waxay yeelanaysaa Shaabad caan ah oo loo ekaysiinayo siduu gooyo Golaha Tacliintu, oo laguna suntayo waraaqaha rasmiga ah ee ka soo baxa Jaamacadda.

## QODOBKA 56

## KA MAQNAANSHAHA SHIRARKA GUDDIYADA

Hagaagsanaanta go'aannada shirarka guddiyada, sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose lagu dhisay, waxyeellayn mayso ka soo qaybgelid la'aanta xubin kasta oo guddiga ka mid ahi ama iin ka soo baxda magacaabidda xubin shirka ka qaybqaadatay.

## QODOBKA 57

## KU-SIMID JAGO

1. Qof kastoo ka mid ah shaqaalaha Jaamacadda, waxaa loogu dhiibi karaa ku meel-gaar ahaan jaga ka sarraysa tan uu rasmi ahaan u hayo.

2. Qofka loogu dhiibo jago sida kor ku sheegan, hayana muddo 30 maalmood dhaafaysa, wuxuu xaq u leeyahay bishiiba gunnada lagu qaato jagada cusub oo ku-meel-gaarka loogu dhiibay.

## QODOBKA 58

## SANNADKA MAALIYADDA

Sannadka Maaliyaddu wuxuu bilawdaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhammaadaa 31ka Disheembar.

## QODOBKA 59

## AFKA WAXBARASHADA

Inta laga gaarayo waqti ay suurowdo in la helo hal af oo rasmi ah oo Jaamacadda wax looga barto, go'aanna uu ku gaari doono Guddiga Sare, kulliyadaha waxaa wax lagaga baranayaa afafka : Soomaaliga, Carabiga, Ingiriiska iyo Talyaaniga, iyadoo la tixgelinayo sida kulliyaddaas u suuragal ah ama hawsheeda u fududaynaysa.

## QAYBTA VIII

## QODOBBO UGU DAMBAYS AH

## QODOBKA 60

## X E E R A R

Xeerar lagu hirgeliyo sharcigan, waxaa awood u leh inuu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda oo uu u soo jeediyo Wasiirku, iyo Wasiirka oo uu u soo jeediyo Raktarku.

## QODOBKA 61

## B U R I N

Waxaa la burinayaa Sharciga tirsigiisu yahay 47 ee 23kii Oktoobar 1974 ee Jaamacadda, iyo wax allaale wixii sharciyo iyo xeerar oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

## QODOBKA 62

## NUQULKA RASMIGA AH

Hadday is-khilaafaan afafka sharcigani ku qoran yahay, waxaa la raacayaa kan Soomaaliga ah.

## QODOBKA 63

## DHAQAN GELID

1. Sharcigan waxaa lagu biirinayaa sharciyada rasmiga ah ee JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta rasmiga ah.

2. Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa markuu ku soo baxo Faafinta rasmiga ah ee J.D.S,

7, Sebtembar 1977

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

**Jaalle Sar. Gaas Maxamed Siyaad Barre**